



Dugsiyada Dhexe: Warbixinta horumarka Laga Sameeyey Dugsiyada Dhexe

Dugsiyada degmadu waxa ay furayaan labo dugsi dhexe oo cusub, kuwaasi oo kala ah Roseway Heights iyo Harriet Tubman iyaga oo qeyb ka ah dadaalka loogu jiro; sidii loo siin lahaa ardayda dugsiyo dhexe waxbarasho loo siman yahay oo fara badan bulshada dhexdeeda. Hawshani baaxada weyn ee la xiriirta dhowrka iskuul ee Dugsiyada Dadweynaha Portland, barnaamijyada iyo waaxyaha. Halkan ka fiiri horumarka ilaa imika laga sameeyey:

Dugsiga Dhexe ee Roseway Heights

- Hay'ada Qaxootiga caawisa ee IRCO waxa ay qoysaska Soomaalida ah siineysaa gaadiidkii ay ku tegi lahaayeen Roseway Heights si ay dhismaha iskuulka u soo booqdaan.
- Shaqaale ayaa ka qeybgalaya shirka qoysaska loo qabanayo ee lagu qabanaya dhismaha guryaha Broadway Vantage housing si ay uga jawaabaan su'aalaha ku saabsan isbedelka lagu sameynayee ee Dugsiga Dhexe loo bedelayo K-8.
- Maalinta Tallaadada ee bsiha Maarso tahay 13ka, shaqaale ayaa ka qeybgalaya kulanka Rosewood Community Association kulankaasi oo lagaga wada hadlaya horumarka laga sameeyey dugsiyada dhexe.
- Kulanka labaad ee bulshada loo qabanayo waxaa la qaban doonaa maalinta Arbacada, Maarso 14keeda, kaasi oo ah sidii looga wada hadli lahaa "Xushmeynta iyo Dhisida Barashada Dhaqanka Bulshada." Booqashada waalidiintu ay dhismaha ay booqanayaan waxa bilaabmeysaa saacadu marka ay tahay 6:30 fiidkii, booqashada dhismaha ka dib, waxaa dhici doono shirkii bulshada saacadu marka ay tahay 7:00 habeenimo.
- Waxaa la sameeyey [shabakada cusub](#), oo ay ku jiraan jadwalka sanad-dugsiyeedka, su'aalaha inta badan la isweydiyo iyo shaxda shaqaalaha.
- Iskuulku hadda wuxuu leeyahay calaamad (loogo) u gaar ah taasi oo ah mid ku meel gaar ah oo ay ku jiraan dhammaan iskuulada ay mustaqbalka ardaydu ka iman doonaan.

Harriet Tubman

- Shirka loo qabanayo bulshada ayaa waxaa lagu qaban doonaa maalinta Khamiista, bisha Maarso 15keeda Dugsiga Boise-Eliot/Humboldt. Ka qeybgalayaashu waxa ay fursad u heli doonaan in ay ku soo biiriyaan fikradahooda la xiriira waxbarashada dhaqankoodu aanu ka hor imaneyn.
- Waxaa socota shaqadii lagu sameynayey sidii uu iskuulku u yeelan lahaa shabakad u gaar ah isaga u gaar ah.
- Iskuulku wuxuu leeyahay calaamad u gaar ah oo ku meel gaar ah oo cusub, taasi oo lagu muujinayo sawir- gacmeedka Harriet Tubman.

- Waalidiinta iyo shaqaalaha waxaa la siin doonaa wararka ugu dambeeya ee ku saabsan gaadiidka basaska iskuulada iyo dariiqyada ardayda iskuulada kale ka iminaysaa iskuulkani ay ka soo aadi karaan.

ACCESS Academy

- Tiro lagu qiyaaso 30 qof ayaa ka soo qeybgalay shirkii bulshada ee dhacay bisha Maarso 7deedii.
- Wakiilo ka kala socda gaadiidka iyo addeega daryeelka xannaanada caruurta ayaa waxa ay soo bandhigeen addeegyada ay ka bixin doonaan dhismahani cusubi ee Holladay-Youngson.

Barnaamijyada Gaarka ah ee Pioneer

- Kulankii bulshada ee dhacay bisha Maarso 1deedii waxaa lagaga wada hadlay qorshayaasha barnaamijkan loogu rarayo Iskuulada Applegate iyo Rice.
- Tallo soo jeedintii shaqaalaha qaar ka mid ah ay soo jeediyeen ka dib , dugsiyada degmadu waxa ay raadinayaa goob saddexaad oo suurtagal ah kuna taala dhismaha Columbia.
- Waxaa la isku raacay qabashada dood ku saabsan isticmaalka shuruudu ku xiran tahay dhismaha Rice 7:00 habeenimo ee maalinta Khamiista ah, bisha Maarso 15keeda oo loo qabanayo Ururka Dariska Rose City Park. Goobta lagu qabanayo kulankan oo ah : Xannaanada Bilowga ee ku taala cinwaanka Owen Blank School, 909 NE 52nd Ave., Portland, 97213.
- Kulanka waalidiinta ee dambe waxaa loo ballamay maalinta Isniinta , bisha Maarso 19deeda, saacadu marka ay tahay 6:00 fiidkii, goobtuna waa Pioneer. Waxaa diyaar laguula yahay cunto iyo shaqaale kuu daryeela caruurta yaryar ee kula socota inta shirku socdo.
- Wixii macluumaad dheeraad ah halkan kala xiriir: <https://www.pps.net/Page/10776>